# Mashruuca Xasuusta Grenfell

London Fire Brigade

Ka qaybgalka Talo Bixinta Hordhaca ah

**Xog kooban oo ku saabsan Warbixinta iyo Falanqeynta**

Qoraha: Clive Caseley, Sue Clegg

Taariikhda: 15 ka Agoosto 2025

Warbixintaan waxaa lagu heli karaa qaabab kala duwan, si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, fadlan iimayl u dir: Grenfell.Engagement@london-fire.gov.uk

Fariin qoraaleed u dir ama Wac: 07385 382580

verve

# MAWDUUCYADA


1 XOGTA KOOBAN EE FULINTA HAWSHA

1.2 NATIIJOOYINKA MUHIIMKA AH

1.3 SOO JEEDINADA



Citibase
67-71 Lewisham
High Street
London SE13 5JX

REG VAT GB 858230025
Wuxuu ka diiwaangashan yahay Ingiriiska Lambarkiisuna waa 05358457
Xafiiska diiwaanka gashan:
24 Old Bond Street, London W1S 4AP

+44 207 017 2011

hello@vervecommunications.co.uk
www.vervecommunications.co.uk

verve

# 1. XOGTA KOOBAN EE FULINTA HAWSHA

## 1.1 EE KU SAABSAN KA QAYBGALKA

Warbixintaan waa xog kooban oo ku saabsan natiijooyinkii ka soo baxay wada tashiga hordhaca ah ee mashruuca xasuusta Grenfell, kaas oo ay dejisay Kooxda Dabdamiska London (London Fire Brigade, LFB) si ay jawaab macno leh oo waarto loogu helo xallinta khilaafaadka Badelka ah (Alternative Dispute Resolution, ADR) ee madaniga ah.

Hanaankaan ka qaybgalka waxaa loo dejiyay in si toos ah loogu dhageysto Dacwoodayaasha ADR, iyo gaar ahaan qoyska qof u dhaw ka dhintay iyo dadka masiibada ka badbaaday, si loogu wargaliyo waxyaabaha kasoo cusboonaaday soo jeedinta faahfaahsan ee la-tashiga dadweynaha ee mashruuca.

LFB waxay xaqiijisay habka ugu furan, la heli karo iyo habka ugu habboon ee lagula shaqaynayo bulshada Grenfell, marka laga imaado hagaajinta rasmiga ah ee sinnaanta, sida tarjumaadaha, fasiraada iyo qorsheynta kartida.

Isgaarsiinta Verve ayaa taageertay nidaamkaan. Doorka Verve wuxuu ahaa inay dib u eegaan oo ay falanqeeyaan macluumaadka ka qaybgalka ee ay bixiso LFB, oo ay ku jiraan qoraalada shirarka, jawaabaha su'aalaha, wareysiyada, iyo jawaab celinta bandhigyada deegaanka. In kasta oo Verve aysan si toos ah u samayn cilmi baarista, wuxuu raadiyay in uu soo koobo mawduucyada muhiimka ah oo uu aqoonsado saameynta ay ku yeelan karto waxyaabaha kasoo kordha xulashooyinka la-tashiga mustaqbalka.

Nidaamka LFB waxa ku jiray ka qaybgal la diyaariyay oo lala yeesho daneeyaasha muhiimka ah, wada sheekaysi fool ka fool ah, shirarka bulshada, iyo su'aalo uruurinta khadka tooska ah oo ay wax kasoo diyaariyeen wakiilada bulshada.

Aragtiyada laga soo uruuriyay wada-hadaladii ugu horreeyay waxay gacan ka gaysteen qaabaynta su'aalaha iyo qaab dhismeedka ka qaybgalka ballaaran. Markay mawduucyadu soo baxeen, waa la tijaabiyay waxaana lagu habooneysiiyay ka qaybgalayaasha, aakhirkiina waxa lagu wargeliyay qaab dhismeedka su'aalaha iyo qaabka falanqaynta labadaba.

Hawlaha ka qaybgalku waxay mudnaanta siiyeen ka mid noqoshada iyo gelitaanka, iyada oo la isku dayay in lagu daro codad kala duwan, oo ay ku jiraan kuwa dadka aan la matalin iyo dadka aan Ingiriiska ku hadlin.

Kooxda LFB waxay sameeyeen dadaalo aad u adag oo ay ku shaaciyeen shaqada kooxda la beegsanayo iyaga oo loo maraayo waraaqo, iimaylo, fariimo WhatsApp lagu diro, gudbinada ay sameeyaan dadka masiibada ka badbaaday iyo xubnaha qoyska, martigelinta iyo ka qaybgalka dhacdooyinka iyo la shaqaynta wakiilada kooxaha taageeraya dadka ay saamaysay masiibadii Grenfell.

Hogaanka La-tashiga iyo Ka qaybgalka LFB waxaa loo helayay 'sida iyo goorma' ay u baahdaan Dacwoodayaasha ADR iyo shaqsiyaadka ay saamaysay masiibadii Grenfell muddadii la-tashiga ka hor, iyada oo si buuxda u qiraysa in aanay tani ahayn ballan 9-5 ama Isniinta ilaa Jimcaha ee LFB. Ujeedadu waxay ahayd oo ayna wali sii tahay horumarinta xiriirada waara ee ka baxsan baaxada Mashruuca Xusuusta.

Guud ahaan 329 qof, oo ay ku jiraan dadka dhallinyarada ah ee ka qaybgalay hawlaha kooxda dhalinyarada ee Space, ayaa ka qayb qaatay shaqada ka qaybgalka wada tashiga hordhaca ah. Lambarkaan waxaa ku jira 68 xubnood oo katirsan qoys qof ka dhintay, 261 ka badbaaday masiibada, iyo dadka degan Walkways ama dadka kale ee cabashada ADR qaba." (Fadlan eeg Shaxda 2 aad 3.4.1 - Xogta kooban ee ka qaybgalka - Kala dhigdhigista).

Kooxda Ka qaybgalka Bulshadu waxay qabteen 31 shirar (labadaba qof ahaan iyo khadka tooska ah), halka The Space, loo wakiishay inay soo uruuriyaan fikradaha dhalinyarada, waxay

marti galiyeen 4 aqoon is-weydaarsiyo ay hogaaminayeen dhallinyaradu iyo 3 "kulan oo ah dib u milicsi" oo lala yeeshay dhalinyaro ahaa caruur wakhtigii masiibadu dhacday. Kulamadaan is dhex galka leh waxaa lagu kabay xog uruurinta khadka tooska ah ka dhacday, oo ay codsadeen shakhsiyaadka kale ee masiibada Grenfell ay saamaysay ee doorbiday in ay ra'yigooda si gaar ah u wadaagaan. Warbixino dheeraad ah ayaa sidoo kale lagu helay iimaylka.

Ka qaybgalayaashu waxay wadaageen aragtiyo, fikrado iyo rabitaanka mustaqbalka ee la xariira Mashruuca Xasuusta Grenfell, kuwaas oo lagu lafa-guray afar ciwaan oo mawduuc:

1. Mashruucyada Xasuusta ee Shaqsi
2. Carruurta iyo Dadka Dhallinyarada ah
3. Kahortaga Masiibooyinka Mustaqbalka
4. Adkeysiga Bulshada.

Jawaabaha ka qaybgalku waxay taageeraan horumarinta barnaamij ee geesinimada iyo jawaab celinta leh, iyo tallooyinka LFB waxaa lagu qaabeeyay mawduucyadaan, iyo sidoo kale tallooyinka barnaamijka ee loo dhan yahay.

## 1.2 NATIIJOOYINKA MUHIIMKA AH

Iyadoo ra'yigu kala duwan yihiin, LFB waxay maqashay is afgarad ku xeeran qaar ka mid ah mabaadi'da muhiimka ah: dabacsanaanta, sharafta, saameynta mustaqbalka fog, iyo muhiimada ay leedahay awoodsiinta habraacyada ay bulshadu hogaamiso.

Qoyska u dhaw qofka dhintay waxay si joogto ah u muujiyeen muhiimada doorashada iyo madaxbannaanida marka ay timaado xusuusta dadka ay jecel yihiin. Xusuusta ahaan, waxay xuseen, inaysan isku mid ahayn qof walba.

Qoysaska qaar ayaa laga yaabaa inay doonayaan meelo xasiloon si ay u milicsadaan una sameeyaan duco, halka qaar kalena laga yaabo inay rabaan inay ka faa'iidaystaan bulshadooda ama inay u xilsaaraan hawlo hal abuur ama xusuus leh oo gaar ah.

Waa lagama maarmaan in Mashruuca Xasuustu ixtiraamo kala duwanaanshahaan, ka fogaado hal habraaca ku habboon dhammaan, oo uu bixiyo dabacsanaan si loo waafajiyo caadooyinka shakhsi ahaaneed, caqiidada ku saleysan, ama habdhaqanka.

Qaar ayaa muujiyay baahida loo qabo agabyo gaar ah, maamul wax ku ool ah iyo caawinaad wax ku ool ah si ay ugu suurtagasho inay fikradahooda u turjumaan mashaariicda xasuusta shaqsi ee macno iyo waxtar leh

Dhalinyarada yaryar waa diirad cad oo kale. Waxaa jira xog la isku raacsan yahay oo ah in carruurta iyo dhalinyarada ay saameysay masiibada Grenfell — si toos ah ama si dadban — ay sii wadaan inay u baahan yihiin taageero si ay u sameeyaan horumar oo ayna u noqdaan noocyada ugu wanaagsan ee naftooda

Kuwaan kaliya ma ahan dadka waayay xubnaha qoyskooda, laakiin sidoo kale waxaa ku jira saaxiibada dugsiga ee carruurta dhintay, dhalinyarada wali ku nool ama dhigta dugsiga u dhow Dhismaha, iyo dadka waalidkood ama awoowayaashood ay saameysay masiibadu. Dhaawaca shucuurta, waxbarashada carqalada la kulantay, iyo baahiyaha caafimaadka maskaxda ee joogtada ah ayaa dhamaantood kor loo qaaday.

Ka qaybgalayaashu waxay ka hadleen muhiimada ay leedahay hindisayaasha caafimaadka maskaxda ee dhaqan ahaan kartida leh, iyo fursadaha muujinta hal abuurka iyo bogsashada. Ka qaybgalayaal badan ayaa sidoo kale doonayay inay arkaan maalgashi la taaban karo oo mustaqbalka dhalinyaradu helaan: deeqaha waxbarashada, dheefaha waxbarashada, tababar shaqo, tababar iyo hagitaan ayaa dhamaantood laga wada hadlay.

Doorka ururada bulshada ee taageerada dhalinyarada ayaa si wayn loo qiimeeyay, ka qaybgalayaashuna waxay carrabka ku adkeeyeen baahiyaha loo qabo maalgelinta ururka ee asaasiga ah iyo iskudubaridka wanaagsan oo lala yeesho dadaalada deegaanka ka jira ee la midka ah si looga fogaado isku duubnid la'aanta, looga faa'iidaysto sida ugu wanaagsan ee khibradda dadka deegaanka iyo in laga caawiyo dhisidda adkeysiga heerka bulshada.

Dad badan ayaa dareemay in waxbarashada Grenfell — oo ay ku jiraan ku guuldareysiga badbaadada guryaha, sharciga dhismaha, iyo la xisaabtanka hay'adaha - aysan si ku filan u badelin dhaqanka warshadaha ee kala duwan

Waxaa jira rabitaan cad oo loogu talagalay Mashruuca Xusuusta si loo taageero waxbarashada, tababarka, iyo u doodista oo ka hortagaya musiibo la mid ah tan inay mar kale dhacdo.  Ka qaybgalayaashu waxay door bideen tababbarka iyo wacyigelinta lagu beegsanaayo xirfadlayaasha gaar ahaan Deegaanka la dhisay iyo guryaha tusaale ahaan, naqshadeyaasha, injineerooyinka deeegaanka, shaqaalaha dhismaha, xirfadlayaasha amniga dhismaha.

Dad badan ayaa taageeray fikradaha Sii wadista Horumarinta Xirfadlaha (Continuing Professional Development, CPD) ee warshadahaan in lagu wargeliyo dadka waaya-aragnimada u leh ee masiibada ka badbaaday iyo xubnaha qoyska ee dhow.  Waxaa jiray xiiso ah in casharadaan lagu daro aqoonsi xirfadeed, koorsooyin waxbarasho oo waxbarasho, iyo heerar sharci.
Dadka hawsha wax ku biirinaya waxay carabka ku adkeeyeen awooda kooxaha dadka masiibada ka badbaaday ay hogaaminayaan, sheekada qoyska dadku ka dhinteen, iyo ku lug lahaanshaha bulshada oo fure u ah horumarinta waxbarashada iyo/ama agabka tababarka—halkii ay ka ahaan lahaayeen tababar heer sare ah ama ol-oleyaal muuqda.

Adkeysiga bulshada looma qoondeyn oo kaliya in looga soo kabto waxyeellada laakiin sidoo kale taageerada hawlaha bulshada iyo dhisida awooda (oo ay ku jirto xoojinta kaabayaasha si loo taageero bulshooyinka ay si aan xad lahayn u saamaysay masiibada Grenfell).  Sidoo kale qaab ayaa carabka ku adkeeyay qiimaha tababarka gargaarka degdegga ah, waxbarashada badbaadada dabka, iyo kulanada wacyigelinta bulshada si looga caawiyo dadka deegaanka inay wax ka qabtaan marka ay dhibaato jirto.

Dhisida kalsoonida iyo aqoonta heerka bulshada — gaar ahaan dhismooyinka kamidka ah dhismaha iyo kooxaha nugul dhexdooda — ayaa loo arkay tallaabo muhim ah oo loo qaaday dhanka adkeysiga.  Waxaa jira rajo la wadaago oo ah in Mashruuca Xasuusta ee Grenfell uusan ka qayb qaadan doonin bogsashada oo keliya, laakiin uu ka qaybqaadan doono dhisida xoogga, diyaargaroowga, iyo iskaashiga mustaqbalka.

Soo jeedinta xarun bulsho oo arrintaan ka go'an tahay ayaa heshay taageero xoogan oo baahsan—gaar ahaan haddii ay noqon karto meel badbaado leh, soo dhawayn leh, iyo meel dhalinyarada ku habboon gaar ahaan dhammaan dadka degan deegaanka. Ka qaybgalayaashu waxay carabka ku adkeeyeen, si uu macno u yeesho, in xaruntu ay ku taalo

meel u dhow Grenfell Tower oo ay si sahal ah u geli karaan bulshada deegaanka. Xarunta muhiimka ah waxay noqon doontaa meel ujeedo badan leh loona habeeyay si kor loogu qaado xiriirka bulshada, bogsashada, iyo korriinka shaqsiyeed. Waa inay bixisaa jawi badqab leh oo ay dhalinyarada iyo dadka degan deegaanka ee da' kasta ay isugu yimaadaan, dareemaan dareen lahaanshaha, oo ay helaan fursado macno leh.

Dad badan ayaa ka dhawaajiyay niyad jab ah inay weli jirto xaalad degdeg ah ama daneyn la'aan ka timid hay'adaha qaar. Mawduuca xoogan ee guud ahaan ka qaybgalku wuxuu ahaa go'aaminta in casharada laga bartay ay tahay inay horseedaan isbadelo waara.

Ayadoo loo maraayo muraajacadaan ka qaybgalka, LFB waxay soo uruurisay fikrado badan oo ku saabsan hamiga barnaamijka, hal abuurnimada iyo fikradaha dhiirigelinta, waxayna mudnaan u leedahay inay maqasho sheekooyinka dad badan oo ay saamaysay musiibadii Grenfell.  Dadku waxay hadda eegayaan Mashruuca Xusuusta ee Grenfell si ay qaybtooda uga qaataan sameynta isbadelka.

## 1.3 SOO JEEDINADA

Talo soo jeedintu waxay salka ku haysaa fikradihii la wadaagay intii lagu jiray wada tashiga hordhaca ah oo loogu talagalay in lagu hago marxaladaha xiga ee horumarinta iyo wadatashiga barnaamijka.  Waxaa lagu soo koobay hoos iyada oo si faahfaahsan looga helaayo qaybta 6 aad ee warbixinta.

### 1.3.1 MASHRUUCYADA XASUUSTA EE SHAQSI

**Talo 1 Mashruucyada xusuusta ee shaqsi - go'aamo wax ku ool ah oo mabda'a ku saleysan**

LFB waa inay tixgelisaa sameynta qorshe deeq waxbarasho oo gaar ah si loo qaybiyo qaybta qeexan ee dejinta deegaanka si loo taageero mashaariicda xusuusta shaqsi.  Tixgalin dheeraad ah oo ay bixiso LFB ayaa looga baahan yahay horumarinta qaab dhismeedka nidaamka lagu bixin karo, cabirka deeqda, u qalmitaanka iyo habka codsiga.

**Talo 2 Taageerada dadka si ay u horumariyaan mashruucooda xusuusta shakhsi**

Si loo hubiyo helitaan loo siman yahay, jawaab celintu waxay soo jeedinaysaa in LLB ay tahay inay awood u siiso shaqsiyaadka si ay u horumariyaan mashruucooda xusuusta shaqsi, siinta wakhtiga iyo goobta dadka si ay u muujiyaan oo ay u qeexaan fikradahooda xasuusta iyadoo aan cadaadis lagu saarin inay u hogaansamaan filashooyinka dadka kale.

### 1.3.2 CARRUURTA IYO DHALINYARADA (JIRA ILAA 30 SANO)

**Talo 3 Taageerida fursadaha waxbarasho, waxbarashada iyo tababar xirfada**

Waxaa jira taageero ballaaran oo ah in carruurta iyo dhallinyarada la caawiyo si ay u gaaraan hamigooda waxbarasho iyo xirfada.

LFB waa inay u abuurtaa qorshe deeq dabacsan oo loogu talagalay shaqsiyaadka da'yarta ah ee ay saamaysay Grenfell, oo daboolaysa waxbarashada, farsamada gacanta, iyo waxbarashada aan rasmiga ahayn.

**Talo 4 Carruurta iyo dhallinyarada mudnaanta u leh taageerada**

Ka qaybgalayaashu waxay muujiyeen rabitaan cad oo ah in diirada la saaro taageerada carruurta iyo dhallinyarada ay sida wayn u saamaysay masiibada.

LFB waa inay qeexdaa cidda ay soo jeedinayso in mudnaanta la siin doono taageerada shaqsi, iyada oo la hubinayo in si caddaalad ah oo hufan loo wada gaaro.

**Talo 5 Waxbarashada iyo xirfadaha Nolasha ee aan Rasmiga ahayn**

Dhallinyarada iyo qoysasku waxay carabka ku adkeeyeen muhiimada ay leedahay hawlaha aan tacliinta la xariirin ee taageera bogsiinta, kalsoonida iyo xirfadaha nolasha.

LFB sidoo kale waa inay tixgelisaa sameynta deeqo la heli karo oo gacan ka geysta horumarka shaqsi, xirfadaha nolosha iyo/ama horumarinta karti la aqoonsaday.

**Talo 6 Taageero ee loo maraayo ururada bulshada**

Sida machad wayn oo deegaanka ka jira, LFB waxay ku habboon tahay inay ka faa'iideysato shabakadeeda iyo sidoo kale maalgelinta dejinta ADR, waana inay:

- La shaqeysaa ururada la aasaasay ee taageeraya dhalinyarada
- Dhiiri gelisaaa wada shaqaynta iskana ilaalisaa carqaladaha
- Taageertaa horumarinta xooga shaqada iyo adkeysiga
- Maalgelisaa kaabayaasha muuqda iyo kuwa dhijitaalka ah ee waxqabadyada dhalinyarada ee u dhow bulshooyinka Grenfell.

### 1.3.3 KAHORTAGA MASIIBOOYINKA MUSTAQBALKA

**Talo 7 Ka faa'iideysiga awooda marqaatifurka dadka nool ee waayo aragnimada u leh masiibada si kor loogu qaado wacyiga oo loo wado isbadelka dhaqanka**

Ka qaybgalayaal badan ayaa carabka ku adkeeyay muhiimada ay leedahay in runta laga sheego masiibada Grenfell qaabab saameeya isbadelka dhabta ah gaar ahaan warshadaha ka dhex jira Deegaanka:

- Tan waxaa ka mid ah dadka masiibada ka badbaaday iyo sheeko soo bandhigayaasha, iyo wadaagista marag-furka taasoo qayb ka ah agabka tababarka
- Nidaamka wax ka abuurka horumarka, ka qayb gelinta dadka masiibada ka badbaadau iyo qoysaska ay saamaysay waa inay aqoonsadaan mudnaanta iyo fariimaha muhiimka ah
- Iskaashiyo waa in lala yeeshaa warshadaha deegaanka la dhisay iyo machadyada xirfadaha
- Natiijooyinka waa in laga heli karaa meel ka baxsan UK ayadoo lagu saleynaayo cilmi baaris adag.

**Talo 8 Jid cad oo lagu keenaayo isbadelka badbaadada dhismayaasha**

Waxaa jira walaac qoto dheer oo ku aadan inaan casharada hoose ee Grenfell aan loo bogin.

LFB si fiican ayaa loo meeleeyaa si ay uga faa'ideysato khibradeeda iyo xiriirka ay la leedahay ururada muhiimka ah si ay u taageerto shaqada si toos ah u saameeya ku dhaqanka qaybta deegaanka la dhisay. Waxaa lasoo jeediyay:

- In arrintaan ay si adag diirada u saarto warshadaha deegaanka la dhisay
- Ilaha tayada sare leh — qalabyada, hagitaanka, filimaanta — waa in lala sameeyaa qoysaska dadka ka dhinteen, dadka masiibada ka badbaaday iyo khubarada farsamada oo dib loo eego
- Faafinta waa in loo qorsheeyaa si istiraatiji ah iyada oo loo maraayo nidaamiyaal, bixiyaasha waxbarashada iyo hogaamiyaasha warshadaha

- Waa in awooda la saaro taageero aragti fog leh - soo saarista macluumaad iyo hagitaan laga heli karo meel ka baxsan UK.

### 1.3.4 ADKEYSIGA BULSHADA

**Talo 9 Abuurista Nidaamka Deeqda Adkeysiga Bulshada**

Ururada bulshada ayaa si joogto ah loogu aqoonsaday inay yihiin gundhiga taageerada deegaanka. Si loo sii xoojiyo kooxahaan oo kor loogu qaado bogsashada, ka mid noqoshada, iyo adkeysiga ka dib musiibadii Grenfell, waxa lagu talinayaa in Kooxda Dab demiska London (LFB) ay tixgeliyaan samaynta qorshe deeq bixineed oo la beegsanaayo si loo taageero hindisayaasha ay bulshadu hoggaamiyaan.

Qorshaha deeqda la soo jeediyay waa inuu bixiyaa maalgelin aasaasi ah iyo mid mashruuc gaar ah labadaba kuwaas oo:

- Bixiya adeegyo iyo waxqabadyo dhaqan ahaan karti u leh horumarinta caafimaadka dhimirka, badqabka guud, iyo wada jirka bulshada—gaar ahaan dadka naafada ah, waayeelka, iyo dadka nugul ee deegaanka
- Abuura fursado dadka deegaanka helaan iyo bulshooyinka si ay isugu yimaadaan si ay wax u bartaan, uga shaqeeyaan, oo u dabaaldegaan, kor ugu qaadaan bogsashada iyo midnimada
- Kor u qaada wacyiga arrimaha Grenfell la xiriira oo hubiya in casharadii la bartay ay sii wadaan in la wadaago oo bulshadu helaan.

**Talo 10 Horumarka xarun bulsho**

Waxaa jirta taageero xoogan oo loogu talagalay xallin bulsho oo joogto ah, ujeedooyin badan leh oo ku xiran soo kabashada Grenfell iyo dhaxalka sifooyinkaan:

- Xarun caadi ah oo ay ka go'an tahay inay bixiso meel loogu talagalay bixinta adeegyada dhalinyarada, ducada diimaha badan, nashaadaadka daryeelka, iyo waxqabadyada bulshada ee kala duwan
- Naqshadeynta, maamulka iyo barnaamijyada waa inay abuuraan dadka deegaanka ee ay saameysay masiibadu, gaar ahaan qoyska dadka u dhaw ka dhinteen, dadka ka badbaaday masiibadaba iyo dadka deggan agagaarka Grenfell Tower
- Qorshe ganacsi oo cad iyo qaabka maalgelinta si loo xaqiijiyo waaritaanka mudada fog.

### 1.3.5 ARRIMAHA MASHRUUCA EE BALLAARAN

**Talo 11 Kooxo iyo qaab dhismeed loo wada dhan yahay, wada shaqeyn leh, bulshadu hogaamiyaan**

LFB waa inay dhistaa habab maamul oo hufan si ay u kormeerto qayb kasta oo ka mid ah Mashruuca Xusuusta iyo dhammaan barnaamijkaba:

- Qaab dhismeedkaan waa inay ku jiraan qoyska dadka dhow ka dhinteem, wakiilada bulshada deegaanka iyo khubarada ay khusayso

- Xubnaha waa in lagu soo xulaa hanaan caddaalad ah oo loo dhan yahay, oo leh caddaymo ku saabsan bixinta, saameynta, iyo awoodaha go'aan qaadashada.

**Talo 12 Bixinta deeqda**

Waxaa jira heshiis cad oo ah in LFB ay tahay inay bixiso xalka dadka deegaanka ee ADR inta badan iyada oo loo marayo deeq bixinta iyo abaal marinaha shaqsiyaadka iyo kooxaha bulshada.

verve

Waxaa lagu talinayaa in qorshaha deeqaha shaqsi ee mashruuca dhexdiisa lagu sameeyo:

- Bayaan cad oo ujeedo leh iyo ka faa'iideystayaasha la qeexay, oo la wada sameeyay
- Habka la sheegay ee qaab dhismeedka qorshaha (cabirka abaal marinada, dabeecada waxqabad ee la taageeray, shuruudaha u-qalmitaanka ee shaqsiyaadka, ururada iyo/ama iskaashiga, iwm.)
- Nidaamka abaalmarinaha la qaabeeyay (shuruudaha abaalmarinta, nidaamka codsiga, qiimaynta iyo habraacyada go'aan qaadashada; wax kasta oo looga baahan yahay qaataha si uu usoo sheego, iwm.)
- Hanti-dhowrka maaliyadeed ee haboon iyo la xisaabtanka (oo ay ku caddahay heerka warbixinada looga baahan yahay dadka helaya abaalmarinada).

**Talo 13 Istaraatiijiyada isgaarsiinta ee isla barnaamijka**

Xiriir wax ku ool ah ayaa muhiim u ah xaqiijinta daahfurnaanta iyo dhiirigelinta ka qaybgalka, LFB-na waa inay horseedaa horumarinta istaraatiijiyada isgaarsiinya iyo qorshe hawlgelinta ee Mashruuca Xusuusta laftiisa.

**Talo 14 Soo jeedinada Nidaamyada la-talinta**

Ka qaybgalayaashu waxay filayaan nidaamyada la-tashida adag, hufan oo si wanaagsan loo fududeeyey, LFB-na waa inay raacdaa nidaamka ugu habboon oo ay dhisto mabaadi'da si guul leh loo tijaabiyay intii lagu jiray ka qaybgalka wada-tashiga hordhaca ah.

## Macluumaad faahfaahsan iyo falanqeyn ku saabsan ka qaybgalka wada tashiga hordhaca ah waxaa lagu heli karaa warbixinta ugu weyn ee La-tashiga Hordhaca ah.